# Foomamka Kanoqoshadda Sanadlaha ah ee 2021-2022

Green Bay Area
Public School District
*Engagement. Equity. Excellence.*

## Yaa Laga Doonyaa inuu Aqriyo Ogeysiiskan?

Dhamaan waalidiinta iyo Mas'uuliyiinta, iyo arday kasta oo da'diisu ka weyn tahay 18 jir, waa inay dib u eegaan macluumaadkan si ay u fahmaan xuquuqdooda iyo masuuliyadahooda.

## Maxay ka dhigan tahay ka bixitaanka?

Waxyaabaha soo socda waa sharaxaad ku saabsan macluumaadka aad xaqa u leedahay inaad ka joojiso ilmahaaga macluumaad la wadaagidiisa:

- **Xogta buug-warbixineed:** Waalidka/mas'uulka, ama ardayga ka weyn18 jir, wuxuu dooran karaa inuu bixinin "xogta buug-warbixineed", sida lagu qeexay dhinaca dambe ee ogaysiiskan, ama si dhameystiran ama xadidan.
- **Warbaahinta:** Waalidka/mas'uulka, ama ardayga kaweyn 18 sano, wuxuu dooran karaa inuusan isticmaalin sawir, codkiisa, magaciisa ama shaqada fasalka, filinka, bogagga internetka ee degmada, bogagga warbaahinta bulshada, ama warbaahinta kale ee la daabaco. Waxaa intaa sii dheer, waxaad dooran kartaa inaadan rabin in ilmahaagu ka qaybgalo warbaahin kasta oo degmadu ogolaatay ama faafinta wareysi ama wada xaajood ah taasoo loo isticmaali karo ujeedo gaar ah ama warbaahinta haddii aadan adiga toos u dirin.
- **Mac-hadyada tacliinta sare iyo kuwa qora milateriga (ee loogu talagalay ardayda Dugsiga Sare):** Waalidka/masuulka, ama ardayga da'diisu ka weyn tahay 18 jir, ayaa dooran kara in laga xayuubiyo siidaynta macluumaadka buug-warbixineed ee ardayga qorayaasha ciidan iyo/ama hay'adaha tacliinta sare.
- **Teknoolojiyada (loogu talagalay ardayda kayar da'da 13ka):** Waalidka/mas'uulka ayaa dooran kara in ardayga laga joojiyo isticmaalka ilo kasta oo ay degmadu soo xushay isla markaasna ogolaatay iyo/ama macallinka ardayga.
- **Baaritaanka Dhinaca Maskaxda:** Waalidka/mas'uulka amardayga kaweeyn da'da 18, waxa uu doran karaa in diido baaritaano badan dhinaca caafimaadka oo eey dagmada fuliso.

## Sideen u joojiyaa?

Waalid kasta ama mas'uul kasta oo diidan siidaynta macluumaadka qaarkood ee la xariira cunugiisa/geeda wuxuu xaq u leeyahay inuu diido bixinta macluumaadkaan. Haddii aad rabto inaad sidaa yeesho, Foomka diidmada waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee degmada www.gbaps.org/parents/forms. Haddii aadan haysanin internet, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa xafiiska Iskuulka ilmahaaga si aad u codsato Foomka kabixida.

**Fadlan ogsoonow: Uma baahnid inaad codsato ama soo celiso Foomamka inta aanan ka ahayn in aad diiday inaad bixiso mid ka mid ah macluumaadka kor ku xusan ee ku saabsan ilmahaaga.**

**Haddii aad diiday inaad la qaybsato wax kamid ah macluumaadka ku saabsan ubadkaaga, fadlan buuxi foomka ku haboon kuna soo celi Iskuulka ilmahaaga ugu dambeyn Sebtembar 22, 2021.**

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqdaada,fadlan la xiriir Iskuulkaaga ama Waaxda Sharciga ee Degmada ee telefoonkeedu yahay (920) 448-2000.

# MACLUUMAAD KU SAABSAN OGEYSIISKA

Xeerka Sharciga ee Wisconsin § 118.125 iyo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska ("FERPA"), Sharciga Federaalka, wuxuu farayaa in Dugsiyada Degmada Green Bay ("Degmada"), marka laga reebo qaarkooda, inay helaan ogolaansho qoraal ah kahor inta aan la wadaagin macluumaadka shakhsiga lagu aqoonsan karo ee diiwaanka waxbarashada ee ilmahaaga.Si kastaba ha noqotee, Degmada ayaa la wadaagi karta "hagaha macluumaadka " ee loo yaqaan "directory information" ama "xogta macluumaadka" iyada oo aan la helin oggolaansho qoraal ah, haddii aanad Guddiga waxbarashada kugula talin inayan sidaas samaynin maadaama oo ay  waafaqsan Xeerka Degmadu ee 347 iyo 347. Ujeedada ugu muhiimsan ee hagaha macluumaadka  ayaa ah inay u ogolaato Degmadu inay  ku darto ilmahaaga macluumaadka diwaanka waxbarashada kasoo lagu daabaco Iskuula qaarkood. Tusaale ahaan waxaa ka mid ah:

- Barnaamij, muujinaya doorka ilmahaaga kuleeyahay soo saaridda riwaayadaha;
- Buugga sanadla ah iyo/ama sawirada kooxda fasalka;
- Aqoonsi musharafeed ama liiska aqoonsi kale;
- Barnaamijyada Qalinjabinta;
- Warqadda xirfada cayaaraha, sida lagdanka, baarida miisaanka iyo dhererka xubnaha kooxda; ama
- Kusoo darida liisaska fasalka ka hor bilawga sanad dugsiyeedka.

Hagaha macluumaadka, macluumaadkaas oo guud ahaan aanan tixgelinin xeerka Wis. Stat. § 118.125 iyo FERPA oo mar haddii macluumaadka la siidaayo waxay waxyeello u geysanysaa sirta, waxay sidoo kale lala wadaagi karaa ururada kabaxsan Iskuuladda iyada oo aan la helin  fasax qoraal ah ee waalidka/masuulkaUrurada ka baxsan waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, shirkadaha soo saara fasirada fasalka ama waxay daabacaan buugaga sanadlaha ah. Intaa waxaa dheer, sharciga federaalka iyo gobolka ayaa u ogolaanayaa in degmooyinka dugsiyada ay lawadaagi karaan macluumaadka ardayga kulliyado farsamo, hay'ado tacliin sare ah iyo kuwa qoro ciidanka, marka laga codsado, macluumaadka soo socda - sida magacyada, cinwaanada iyo liiska telefoonka – ilaa waalidka/mas'uulka ama ardayga dugsiga sare ee u qalma (da'da 18 ama ka weyn)  kula taliyaan inaysan Degmada rabin in macluumaadka ilmahooda lala wadaago iyaga oo aan ogolaansho  hore ee qoraal ah laga helin, ama sharciga federaaliga ama gobolka ayaa mamnuucaya wadaagista macluumaadka noocaas ah (Tusaale., ardayga guri la'aanta ah oo kunool qorsha nolol maalmeedka ah ayaan loo arkin inuu kamid yahay xogta macluumaadka).

Haddii aan oggolaansho laga haysanin xogta diiwaanka inay waalidka/ masuulka saxiixeen ama ardayga xaqa u leh oo (da'da 18 ama ka weyn),  buuga xogta waxaa loo bixin doonaa sida sharcigu dhigayo haddii kale degmada oo kaliya ayaa bixin doonta marka ay kuxiran tahay degmada ama kooxaha la xiriira dugsiga, hawlaha ama ujeedooyinka. Xogta diiwaanka la lama wadaagi doono cid sadexaad ee aan ka ahayn Degmo ama koox Iskuul, kuwaas ka tirsan xukunka Degmada, si ay sameeyaan codsi ujeedkiisu yahay ogaashaha ardayda ama waalidkood/ilaaliyahooda.

Haddii aadan rabin in Degmadu la wadaagto mid ama dhamaan noocyada macluumaadka hoosta ku qoran sida macluumaadka ee diiwaanka waxbarashada ee ilmahaaga adiga oo aan hore u bixinin ogolaansho qoraal ah,waa inaad degmada u soo sheegtaa si qoraal ahaan ah 14 maalmood gudahood markaad hesho ogeysiiskan. Nidaamka Degmadu wuxuu taxayaa macluumaadka soo socda sida buugga macluumaadka:

- Magaca ardayga;
- Cinwaanka guriga;
- Liiska tilifoonka (haddii aan lambarku liiska lahayn);
- Taariikhda Dhalashada;
- Maadada aad baranaysid;
- Ka qaybqaadashada hawlaha iyo cayaaraha rasmiga ah;
- Miisaanka iyo dhererka xubnaha kooxda cayaarta;
- Taariikhda imaanshaha;
- Sawirada;
- Shahaado heer jaamacadeed iyo abaalmarinta aad heshay; iyo
- Magaca Iskuulka ugu dambeynta uu ardayga dhigtay.

***Haddii aad qabtid wax su'aalo oo dheeraad ah ama wax walaac ah oo ku saabsan ogeysiiskan ama Foomka kabixida, fadlan la soo xiriir Waaxda Sharciga ee Degmada ee taleefoonkeedu yahay 920-448-2000.***
*Updated 6/1/20*